

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **02/07/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- RUKIYA SHEIKH MUSE, Hooyo: Haboon Maxamed Faarax, Somali ah, Ku Dhalatay: Garissa, Sanadkii: 01/01/1960, Sidata Kenyan passport, Lr. AK0354687

LA WAKIISHE:- C/LLAAHI AXMED DAAHIR, ina Seynab Shiiq Maxamed, Somali ah, Dhashay Sanadkii 12-12-1977, Degan Darusalaam, Sita License, Lr. 48362, Kana soo baxay Dowladda Federaalka Soomaaliya, Wasaaradda Gaadiidka

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, Cabirka: **(13.50X13.50-Mt)**, Looto No: **2269**, **Sabarlog: 52/20/1974**, **Tr. 21/12/1974**, Ka Soo Baxday Dawladda Hoose ee Muqdisho.


B- Aniga oo ah **RUKIYA SHEIKH MUSE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **C/LLAAHI AXMED DAAHIR** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Sare Ku xusan ee aan ka dhaxlay Aabaheey Marxuum **SHEEKH MUUSE CABDIRAXMAAN**, hadaba waxaan si buuxda ugu wakiishay in uu ii gadi karo, Xafidi karo, dayactiri karo, kireeyn karo, Xanaaneyn karo, ilaalin karo, u Doodi karo, Qareen ii qaban karo haddii loo baahdo, igu Matali karo dhan kasta la iiga baahdo, iigana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karo kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda u Maamulo Dhulkaas leh tilmaamaha kor kusoo sheegay,

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **C/LLAAHI AXMED DAAHIR** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeybta aan ku leeyahay dhulkaas aan soo sheegay ka macamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **C/LLAAHI AXMED DAAHIR**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **RUKIYA SHEIKH MUSE**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

RUKIYA SHEIKH MUSE



1- ABDIKADIR RABI MOHAMED

Abdikadir Rabi Mohamed

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

C/LLAAHI AXMED DAAHIR

C/llaahi Axmed Dahir

2- FEISAL OMAR ASHKIR

Feisal Omar Ashkir

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1651/T.P.N/25, Tr. 02/07/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **RUKIYA SHEIKH MUSE** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **C/LLAAHI AXMED DAAHIR** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha **Abdikadir Rabi Mohamed** iyo **Feisal Omar Ashkir** Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna ay jirto Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaan Loo Keydiyey Nuqul.

By: ABDU



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



UFFICIO LOCALE DI BOLLETTARIO

POSTA IN ARRIVO
PROTOCOLLO No. 4905

DATA 21/12/74

Bollettario N. 52
Bolletta N. 20
Sannadka 19 74



Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho
WAAXDA DHULKA

Jaalle SHEEKH MUSE CABDIRAXMAAN
MUQDISHO
XARUNTA

Og:- Tal. Ciidamada Booliska Dawladda Hoose

Jaallaha kor ku qoran waxa iyo caglaadey inuu dhiso farriish, barraaka ama
Sanadaqad X odu ka dhiso cad dhul ah oo le'eg

13,50 X 13,50 m kuna yaal Xafad Hodan
Bari

X. Galbeed X. Waqooyi

Wargadan x-q waxaad ugu leedahay muddo fix (6) billood ah oo maanta ka
billaabnaha, fasax la'aan in aad dhulkeeda kudhistid.

Muqdisho taariikh 21/12/74

Agassimaha Waaxda Dhulka



Handwritten signature

Duqa Magaalada
IL VICE SINDACO
(Hassan-Gasim Hassan)



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 05/07/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/laahi Axmed Daahir** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1651/T.P.N/25, Tr. 02/07/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/laahi Axmed Daahir
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	13,50X13,50
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	2269
W.M.L	Sabarloog 52/20/1974, Tr. 12/12/1974
Taariikhda Wakaalada	02/07/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/laahi Axmed Daahir**, Leh Tel No. **0615345594**, Degan **Daarusalaam** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/laahi Axmed Daahir